



Degmada oo bilawday qorshe weyn oo loogu talagalay waxbarashada farshaxanka

Ardayga sanadkii u dambeeyay dhigta Dugsiga Sare ee Madison ee Stella Feuerborn ayaa muddo laba sanadood gudahood ku bartay waxyaabo badan oo ku saabsan fasalka lagu baranayo sawir qaadista. [Sawirka](#) Stella ayaa la sameeyay si uu u noqdo mid ka mid ah qaybaha ardayda ee lagu bandhigay bandhigii sanadlaha ahaa ee HeART of Portland, Dugsiyada Dadweynaha Portland ee dhawaan ka dhacay Madxafka Farshaxanka ee Portland..

Isaga oo tacliinta sare heer fiican ka gaaray, Stella wuxuu awooday in uu si dhaqso ah ugu dhego/ula qabsado fikradaha dhanka sawir qaadista ama qorsheynta muuqaalka. Laakiin macallinka ay leedahay, Randy Maves, wuu is hayn kari laayahay oo wuxuu isweydiinayaa waxa dhici lahaa haddii ay Stella fasalkiisa timaada iyada oo sidata waxyaabaha aasaasiga ee loo baahan yahay ay horeba ugu jireen xirmadeeda qalabka lagu qaato 'toolkit'. Ama haddii ay jiraan arday kale oo aanan dugsiga sare ku qaadan iyaga oo ay sababtu tahay iyada oo aan fasalkoodii hore marnaba ku baran waxyaabaha aasaaska u ah sawir qaadista ama muuqaalka.

“Haddii ay samayn lahayd taasi iyada oo ah fasalka shanaad, way ii imaan lahayd, oo maxaa intaas ka badan oo ay samayn lahayd?” Ayuu sheegay Maves. “Sidee intii hore ka fiican, sidee intee hore ka awood badan ayuu codkeeda wanaagsini noqon lahaa?”

PPS ayaa bilawday qorshe tacliimeed oo weyn, oo loo yaqaan Qorshaha Weyn ee Waxbarashada Farshaxanka (MAEP) oo ardayda fursad siin doona. Iyada oo ay mahada iska leeyihiin Canshuurta Farshaxanka ee Portland, ardayda PPS ee ka tirsan fasallada hoose – kindergarten ilaa fasalka shanaad – ayaa qaadanaya fasallada ay ka helayaan macallimiin aad u tababaran. Qorshaha weyn ee cusub ee dhanka farshaxanku wuxuu raadinayaa in uu yeesho arday qaadata waxbarashada hore ee farshaxanka isla markaana kobca/kora iyaga oo ah farshaxaniistayaal inta ay ku jiraan dugsiga dhexe iyo sare.

Kristen Brayson iyo Carolyn Drake oo ka tirsan barnaamijka Bandhiga Farshaxanka iyo Muuqaalka, ama VAPA, ayaa qorshe dhammeystiran Guddiga Waxbarashada ugu soo bandhigay kulankeedii 16 Abriil. Qorshuhu wuxuu ku xiran yahay [ololaha dhanka Aragtida](#) ee sanad dugsiyeedkani qaadatay degmadu isaga oo hoos imaanaya Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero.

“Waxaan tixgelin siinayaa helitaanka fursadaha farshaxanka oo hodan ah isla markaana awood leh oo laga helo dugsiyada dadweynaha si ay qayb uga noqdaan waxbarasho muhiim ah, oo dhan,” ayuu sheegay Guerrero.

Canshuurta Farshaxanka ee Portland waxaa go'aamiyay xeerka cod bixinta ee 2012. PPS waxay u baahan tahay in ay lacagta laga helo canshuurta u isticmaasho in ay ku bixiso macallimiinta bandhiga farshaxanka iyo muuqaalka ee la aqoonsan yahay ee loogu talagalay ardayda tirsan kindergarten ilaa fasalka shanaad. Dakhliga laga helo canshuurta ayaa PPS u saamaxday in uu ka tago lahaanshaha macallimiinta farshaxanka waqtiga buuxa shaqeeya oo dhan 15 oo loogu talagalay ardayda K-5 oo u gudbo macallimiin dhan 63 oo u adeega 21,738 arday oo ka kala socda dhammaan dugsiyada hoose.

“Lahaanshaha maalgelin degan oo loogu talagalay waxbarashada farshaxanka, K-5 waxay hadiyad weyn u tahay ardaydeena, iyada oo ay mahada iska leeyihiin canshuur bixiyayaashu,” ayuu sheegay Drake.

Qorshaha weyni wuxuu gogosha u xaraa waxbarashada hore ee farshaxanka oo ay ku jiraan dariiqooyin si buuxda u samaysan oo la marayo kuwaasi oo ardaydu sii wadi karto in ay helaan waxbarashada farshaxanka oo isku dhafan, si fiican looga sii fikiray isla markaana loo siman yahay inta lagu jiro fasallada 6 ilaa 12.

Iyada oo lagu jiro Wajiga I ee qorshaha weyn ee cusub ee dhanka farshaxanka, Brayson iyo Drake waxay isku keeneen xog laga helay Maves iyo macallimiinta kale ee farshaxanka ee guud ahaan degmada. Waxay ogaadeen in boqolkiiba 78 oo ka mid ah ardayda degmada loogu adeego/wax la baro iyada oo la adeegsanayo waxbarashada fasalka oo leh qof ku takhasusay farshaxanka. Boqolkiiba 22 ee kale, oo ay ku jiraan meelaha ee laga soo galo Madison, waxaa muhiimada la siin doonaa in fiiro gaar ah oo loo yeesho abuurista dariiqooyin farshaxan oo joogto ah.

Maves, oo ah macallin ruug cadaa ah oo dadka soo baray farsamooyinka farshaxanka caadiga ah sida wax sawirrida, sawir gacmeedka, farsamada farshaxanka ka hor intii aanu ku soo darin farshaxanka ku saleysan tiknoolijiyada sida warbaahinta dhijitalka iyo muuqaalada, ayaa sheegay in uu arkay qiimaha waxbarashada farshaxanka ee joogtada ahi u leedahay ardayda horay uga soo dhigatay dugsiyada dadweynaha ee farshaxanka ama helay waxbarasho gaar ah. Markii ay u yimaadeen, waxay gaareen meel wanaagsan oo waxay fahamsanaayeen aasaaska waxayna sidoo kale ka guuleystaan waxa uu Maves ugu yeero qaybta “halista ah” ee farshaxanka ee uga baahan farshaxaniistaha in uu shaqada soo bandhigo si dadka kale u arkaan.

“Carruurtani ayaa tallaabo weyn kor u qaaday,” ayuu sheegay. “Waxay qabaan kalsooni dheeraad ah, waxay leeyihiin meel ay u socdaan, halista ah niyadjab si joogto ah ayuu meesha uga baday.”

Xataa waqti yar oo gaab Stella – oo nolosha dugsiya ay ka buuxeen fasallada AP iyo ciyaaraha – waxay raadsaday/sii daba gashay sawir qaadista ama qorsheynta muuqaalka, waxay ku kortay qadarinta qiimaha uu leeyahay farshaxanka ku jira manhajkeeda. Inta badan shaqadeedu waxay ku salaysneyd tiknoolijiyada, taasi oo loo isticmaalo meelo kale oo waxbarasho oo badan, waxayna sidoo kale horumarisaa dhinacyo kale ee iyada leedahay qof ahaan.

“Waxaan hadda uun bilaabay in aan guddo galo oo aan ogaado in ay ahayd hab aan ku muujin karo naftayda oo aan ahayn erayo, taasina aad ayay qiime iigu lahayd maxaa yeelay waxay ahayd wax aanan marnaba awoodin in aan hadda ka hor sameeyo,” ayay sheegtay.

Qorshaha weyni wuxuu hadda ku jiraa Wajigii I, iyada oo Wajiga II la qorsheeyay in uu bilaabmo 2019-20, iyada oo Wajiga III la bilaabi doono sanad dugsiyeedka soo raaca. Brayson iyo Drake ayaa sheegay in hadafka meesha wax laga bilaabay ee loogu talagalay kooxda kasta yahay in la siiyo dariiqooyin buuxda oo ah ugu yaraan laba ka mid ah afarta farshaxan ee farshaxanka – qoob ka ciyaarka, muusikada, masraxa iyo muuqaalka. Waxay sidoo kale rajeynayaan in ay ugu dambayn farshaxanka suugaanta ku daraan kooxda. Guerrero wuxuu rabaa in PPS uu hiigsado meel sare.

“Waxaan jeclaan lahaa in aanu noqono kuwo meel wanaagsan ka fikira,” ayuu sheegay.

“Waxaan is leeyahay mida labaad ayaa ah hadafka xiga ee la hiigsanayo, balse waxaan jeclaan lahaa in aan arko in la dhammeystiro dariiqooyinka dhammaan maadooyinka. Aan halkaasi aadno.”